

Tilmaamaha Waalidka laga siiyo

Heerarka Cusub



Dugsiyada Dadweynaha Denver (Denver Public Schools) waxay qaateen Heerarka Cusub [Heerarka Maadooyinka Muhiimka ah ee Gobolka (Common Core State Standards), Heerarka Waxbarashada Colorado (Colorado Academic Standards) iyo Heerarka Horumarinta Luqadda Ingiriisiga (English Language Development Standards)] si loo habsado in ardayda diyaar u noqoto kulliyadda iyo shaqada qarniga 21aad. Heerarka cusub waxay mattalaan isbaddal xagga waxbarashada si faham isfaafaqsan oo cad looga qaato waxa ardayda laga filaayo in ay bartaan heer kasta darajada. Ujeedada waxay tahay in fasalka cunugaada laga dhigo meel in badan ku wanaagsan hawsha, lagana helo fursado xagga wada shaqeynta, wada hadalka iyo xallinta masalooyinka. Waxaa dhici karta in cunugaada uu gudaha fasalka isticmaalo farsamo badan si loo xoojiyo waxbarashadiisa/waxbarashadeeda.

Tilmaanta hoose waxay muujisaa sida Heerarka Cusub (New Standards) u saameyn doonaan cunugaada, isbaddalada aad ku arki doontid shaqada dugsiyada cunugaada iyo waxa aad samayn kartid si aad u kaalmeysid cunugaada inta uu ku jiro fasalka.

FANKA LUQADDA INGIRIISIGA (ENGLISH LANGUAGE ARTS)

WAXA ISBADDALA:	WAXA LOO BAAHAN YAHAY IN LA RAADIYO:	WAXA AAD SAMAYN KARTID:
Cunugaada wuxuu iminka akhrin doonaa sheekooyin badan oo aan qayaali ahayn , heerka darajo kasta.	Raadi in cunugaada uu qaato akhris badan oo ku saleysan dhacdooyinka dhabta ee nololaha, sida taariikhda nololaha qof kale, maqaalo iyo sheekooyinka taariikhda.	Cunugaada la akhri buugaagta aan qayaaliga ahayn. Tus in akhriska qoraalada aan qayaaliga ahayn ahaan karo wax laga helo oo farxad leh.
Cunugaada wuxuu wax ka baran doonaa dunida, wuxuuna u adeegsan doonaa akhriska .	Raadi in cunugaada uu guriga keeno buugaagta ku saleysan xaqiiqada ka jirta dunida oo isaga/iyada u ogolaata in uu wax ka barto sayniska iyo daraasaadka bulshada marka uu adeegsado akhriska.	Ogaaw buugaagta aan qayaaliga ahayn iyo wargeysyada ku habboon heerka darajada ee xiiso u leh cunugaada, iyo hubso in uu heli karo qoraaladaan la akhristo.
Cunugaada wuxuu si wanaagsan u akhrin doonaa qoraalo adag si uu u fahmo waxa isaga/iyada akhriyo una gaaro go'aano u gaar ah.	Cunugaada waxaa la siin doonaa hawsha qorista ee laga yaabo in isaga/iyada dib u sheegaan ama qoraan qeybaha muhiimka ah sheekada ama buugga.	Waxaad cunugaada u keentaa buugaag uu akhristo oo ku sameya taxadi iyo buugaag uu isaga/iyada rabto in ay una akhrisan karto si wanaagsan. Tus isaga/iyada sida qotada dheer ee loo qodo qeybaha adag.
Marka arrinta ku saabsan tahay qorista ama sheegidda sheeko, cunugaada wuxuu adeegsan doonaa "caddeyn" laga soo qaatay qoraalka si uu u taageero waxa isaga/iyada sheegtay .	Raadi qoraalada cunugaada weydiya in uu ku dhiso tusaalooyin dhab ah oo laga soo qaaday qoraalka una shaqeeya sida caddeyn. Caddeyn waxaa loola jeedaa tusaalooyinka laga soo qaado buugga si loo taageero jawaabta.	Weydii cunugaada in uu caddeyn ka bixiyo muranka iyo qilaafaadka lala kulmo maalin kasta. Ku kaalmeey isaga/iyada in uu fahmo farqiga u dhexeeyo bixinta caddeynta iyo bixinta fikradda.
Cunugaada wuxuu baran doonaa sida loo qoro, wuxuuna fikradda ka qaadan doonaa waxa uu akhriyo .	Raadi qoraalo cunugaada weydiya in uu doodaha u soo jeediyo qoraal ahaan isaga/iyada oo adeegsata caddeyn.	Ku dhiirgeli qorista guriga. Wax wada qora idinka oo isticmaala caddeyn iyo tafaasiil.
Cunugaada wuxuu baran doonaa erayo badan.	Raadi hawlaha badiya erayada cunugaada iyo waxaad isaga/iyada bartaa in "luqadda tahay awood."	La hadal cunugaada. U akhri cunugaada iyo la akhri. Dhageyso cunugaada. Ku dhiirgeli isaga/iyada in uu si tafatiran u sharaxo marka uu ka hadlaayo hawlaha loo diro.

Tilmaamaha Waalidka laga siiyo

Heerarka Cusub



XISAABTA

WAXA ISBADDALA:	WAXA LOO BAAHAN YAHAY IN LA RAADIYO:	WAXA AAD SAMAYN KARTID:
Cunugaada wuxuu in badan ka baran doonaa wowduucyo kooban , taasoo ku kaalmeyn doonto in uu gaaro faham buuxa.	Raadi hawlaha u baahan in cunugaada uu muujiyo shaqadiisa/shaqadeeda iyo in uu sharaxo sida uu ku gaaray jawaabta.	Ogaaw fikradaha muhiimka u ah cunugaada taasoo ku saleysan heerka darajadiisa/darajadeeda iyo waqti geli sida aad uga shaqeyn lahayd kuwaas.
Cunugaada wuxuu horumar ka gaari doonaa waxbarashada sannad ilaa sannad , wuxuuna ka bilaabi doonaa aasaas xooggan.	Raadi hawlaha midba midka kale ku dhisan yahay. Tusaale ahaan, waxaa dhici karto in ahamiyadda cunugaada ka wareegto iskudarka, kala goynta, isku dhufashada iyo qeybinta una wareegto jajabyada, kaddibna u sii wareegto aljabrada.	La soco fikradaha uu cunugaada ku dhibtooday sannadkii la soo dhaafay kuna taageer in uu horumar ka gaaro maadooyinkaas. Haddii aad u baahan tahay kaalmo, weydiiso macalinka cunugaada fikradaha heerka darajada uu cunugaada ka shaqeyn karo inta uu joogo guriga.
Cunugaada wuxuu ahaymiyadda siin doonaa fikradaha waaweyn sida xisaabta iyo xirfadaha .	Cunugaada waxaa la siin doonaa shaqada guriga taasoo ahamiyadda siisa sida wanaagsan ee loo barto xaqiigada xisaabta iyo fikradaha xisaabta ee muhiimka u ah guusha laga gaaro xisaabta aad u sareysa.	Ku kaalmee cunugaada in uu isticmaalo aqoonta lagu xalliyay masalooyinka iyo in uu sameeyo "xisaabta lala kulmo" nolol maalmeedka.
Cunugaada wuxuu fahmi doonaa sababta xisaabta u shaqeyso iyo in la weydiyo in uu ka hadlo iyo in uu caddeeyo waxa uu fahmay .	Cunugaada waxaa la siin doonaa shaqo ahamiyadda siisa xallinta masalada iyo sharaxaadda "sida" iyo "sababta" isaga/iyada u adeegsadeen habka ay u xalliyeen.	Ku dhiirgeli cunugaada in uu sharaxo sida isaga/iyada uu u helay jawaabaha masalooyinka.
Cunugaada waxaa iminka la weydiin doonaa in uu xisaabta u isticmaalo xaaladaha dhabta ah ee dunida .	Raadi hawlaha xisaabta ee ku saleysan dunida dhabta ah. Tusaale ahaan, waxaa dhici karto in shaqada guriga ku jirto iskudarka jajabyada marka la soo qaado warqadda tilmaanta cunto kariska ama helidda qiyaasta pizzada uu saaxiibka kunay.	Sii cunugaada fursado uu ku isticmaalo aqoontiisa xisaabta marka uu ku sugan yahay guriga.

HORUMARINTA LUQADDA INGIRIISIGA (ENGLISH LANGUAGE DEVELOPMENT) EE ARDAYDA BARATA LUQADDA INGIRIISIGA (ENGLISH-LANGUAGE LEARNERS)

MAXAA ISBADDALA:	WAXA LOO BAAHAN YAHAY IN LA RAADIYO:	WAXA AAD SAMAYN KARTID:
Macalinka cunugaada wuxuu xoogga saari doonaa luqadda waxbarashada loo baahan yahay xagga maado kasta .	Raadi hawlaha isaga/iyada weydiya in uu wax sharaxo, isbarbar dhigo, baaro, iyo in uu cududaar u sameeyo shaqadiisa/shaqadeeda. Qorista waxyaabaha la filaayo waxaa ka mid noqon doono sida loo dhiso jumladaha iyo habka wax loo qoro sida doodka, qancinta, sharaxaadda iyo akhriska.	Ku dhiirgeli cunugaada in uu ka hadlo waxa isaga/iyada ka barto dugsiga. Weydii isaga/iyada in uu ku hadlo jumlado dhamaystiran oo tafatiran. Waxaan kaloo kugu dhiirgelineynaa in aad sii waddid in aad wax akhrisatid, qorid iyo ku hadashid luqadda aad u dhalatay.
Cunugaada wuxuu heli doonaa kaalmada qof ku takhasusay arrimahaan sida waafaqsan baahida uu u qabo horumarinta luqadda Ingiriisiga .	Raadi hawlaha ku saabsan xaaladaha dunida dhabta ah ee dhiirgeliya wada shaqeynta asxaabta fasalka iyo xubnaha qoyska, halkaas uu cunugaada ka hadli karo fakarkiisa lana qeybsan karo dadka kale.	Hawlaha dheeraadka ah ee laga qabto guriga waxay kaalmo ka geysan karaan horumarka luqadda Ingiriisiga cunugaada. Waxaa jira dhowr ilo internetka aad adeegsan kartid inta aad guriga la joogtid cunugaada, kana mid ah Machadka Khan (Khan Academy), Learn Zillion (Baro Zillion) iyo fiidiyowwada DPS Safari Montage.

ILO DHEERAAD AH

Heerarka Maadooyinka Muhiimka ah ee Gobolka (Common Core State Standards) <ul style="list-style-type: none"> http://www.cgcs.org http://www.pta.org 	Heerarka Waxbarashada Colorado (Colorado Academic Standards) iyo Heerarka Horumarinta Luqadda Ingiriisiga (English Language Development Standards) <ul style="list-style-type: none"> http://www.cde.state.co.us/StandardsAndInstruction/ColoradoStandards.asp
--	--